neighborcare health

# MYCHART PROXY ACCESS REQUEST FORM
# (FOOMKA CODSIGA WAKIILKA EE MYCHART)

| **Macluumaadka Bukaanka** | |
|---|---|
| Magaca bukaanka: | LAMBARKA DIIWAANKA CAAFIMAADKA (ikhtiyaar) |
| Ciwaanka: | Taariikda dhalashada: / / |
| **Macluumaadka Wakiilka (Waalidka, Waalidka Korinaya, Ilaaliyaha Sharciga ah, Wax kale)** | |
| Magaca Wakiilka: | Taariikhda dhalashada ee Wakiilka: / / |
| Magacii hore: | |
| Ciwaanka: | |
| **(ama cinwaanka iimaylka wakiilkiisa ama lambarka taleefanka gacanta ayaa loo baahan yahay si loo sameeyo ogolaanshaha wakiilka)** | |
| Ciwaanka iimaylka wakiilka: | Lambarka Taleefonka gacanta ee Wakiilka: |

**<u>Yar/Ilmo (da'da 0-11) Shuruudaha gelitaanka wakiilnimada</u>:**

- MyChart waxay bixisaa marin u helka xog caafimaad oo xadidan sida natiijooyinka baaritaanka ogaanshaha, daawooyinka, xasaasiyadaha, tallaalada, iyo qoraalada bukaan socodka qaarkood. Kuma jiraan macluumaadka dhamaystiran ee diiwaanka caafimaadka bukaanka. Codsiga nuqullo dhammaystiran oo diiwaannada caafimaadka ah ayaa laga codsan karaa bixiyaha daryeelka caafimaadka bukaanka oo leh oggolaansho sharci oo habboon.
- Wakiil idman waxa uu leeyahay marin la mid ah bixiyayaasha fariimaha, codsada dib-u-buuxinta dawooyinka, ballamaha jadwalka, iyo macluumaad kasta oo kale oo uu bukaanku uu heli karo MyChart, oo ay ku jirto helitaanka macluumaadka caafimaadka qaarkood kaas oo laga arki karo akoonka MyChart ee bukaanka.
- Dhaqdhaqaaqa wakiillada ee MyChart ka dhex jira waxaa la socda hanti-dhawrka kombayutarka. Gelitaanka kasta oo uu sameeyo wakiilku isagoo ka wakiil ah bukaanka ayaa loo aqoonsan doonaa sidaas oo kale waxayna noqon kartaa qayb ka mid ah diiwaanka caafimaadka bukaanka.

**<u>Dhallinta Yar (da'da 12-17) Shuruudaha gelitaanka wakiilnimada</u>:**

- Helitaanka buuxda ee ilmaha yar/cunuga akoonkiisa MyChart si toos ah ayey isu beddeshaa gelitaanka wakiil xaddidan da'da marakay tahay12, taas oo sida uu dhigayo sharciga gobolka Washington gelitaanka wakiil xaddidan ay ku jiraan oo keliya:
  - Xasaasiyadda
  - Macluumaadka taariikhda qoyska
  - Fariimaha u dhexeeya wakiilka iyo kooxda daryeelka (wakiilka xaddidan ma awoodi doonaan inay arkaan fariimaha u dhexeeya bukaanka iyo kooxda daryeelka)
- Ilmaha da'da yar (da'doodu tahay 12+) ayaa laga yaabaa inay dhaqaajiyaan akoonkooda MyChart, iyagoo siinaya inay galaangal u yeeshaan dhammaan macluumaadka MyChart, marka laga reebo biilasha.

  Wixii macluumaad dheer, eeg: neighborcare.org/mychart

**<u>Bukaanka qaangaarka ah (da'da 18+) Shuruudaha gelitaanka wakiillada:</u>**

- Wakiilka idman ee bukaanka qaangaarka ah ee da'doodu tahay 18+ waxa uu leeyahay marin la mid ah bixiyayaasha fariimaha, codsiga buuxinta daawooyinka, ballamaha jadwalka, iyo macluumaad kasta oo kale oo uu bukaanku galo MyChart, oo ay ku jirto helitaanka macluumaadka caafimaadka qaarkood kaas oo laga arki karo akoonka bukaanka ee MyChart bukaanka.
- Dhaqdhaqaaqa wakiillada ee MyChart ka dhex jira waxaa la socda hanti-dhawrka kombayutarka. Gelitaanka kasta oo uu sameeyo wakiilku isagoo ka wakiil ah bukaanka ayaa loo aqoonsan doonaa sidaas oo kale waxayna noqon kartaa qayb ka mid ah diiwaanka caafimaadka bukaanka.

Saxiixa xagga hoose macnaheed waa, inaan aqbalay shuruudahan soo socda:

- Inaan ahay bukaanka qaangaar ah sharci ahaan awood u leh in uu siiyo wakiilka helitaanka macluumaadka caafimaadkayga, **AMA** waxaan xaq u leeyahay in aan galo macluumaadka caafimaadka ee bukaanka sida **waalidkood, waalidkii korsaday, ama masuulka ama ilaalinta si sharci ah loo magacaabay.**
- Xuquuqdayda si aan u galo xogta caafimaadka ee bukaanka sina uma ay beddelin maxkamad sharci ah.
- Dukumeentiyada aan bixiyay si ay u taageeraan xaqa aan u leeyahay helitaanka xogta caafimaadka ee bukaanka, haddii ay jiraan, waa nuqullo run ah oo sax ah waana dukumeentiyadii ugu dambeeyay ee la xiriira arrintan.

**Helitaanka Wakiilka Dadka Waaweyn: Saiixa Bukaanka ama Ilaaliyaha Sharciga ah**
**Helitaanka Wakiilka Ilmaha yar/Cunuga: Waalidka/Waalidka Korinaya/Saxiixa Masuulka Sharciga ah**

Xiriirka bukaanka:
☐ Shaqsiga(loogu talagalay bukaanka qaangaarka ah ee da'doodu tahay 18+ kaliya)
☐ Waalidka
☐ Waalidka Korinaya
☐ Ilaaliyaha sharciga ah/Masuulka
☐ Wax kale: ______________________________________________

| Magaca Daabacan: | Taariikhda: / / | Saxiixa: |
|---|---|---|

**Ku soo celi foomkan oo dhammaystiran iyo wixii dukumeenti taageero ah ee loo baahan yahay miiska hore ee rugtaada caafimaadka si loo habeeyo loona dhiso gelitaanka wakiilka MyChart.**

**FOR FRONT DESK USE ONLY**

**MIISKA HORE KALIYA AYAA ISTICMAALI KARO**

**Check below ONLY if minor proxy access was successfully granted in Epic:**

☐ **SUCCESS**